# Leenka METRO H

## *Gaadiid kuwii hore ka dhaqsa badan ayaa ka soo shaqa galaya marinka Como Avenue iyo Maryland Avenue*

Leenka METRO H waa leen Bus Rapid Transit (BRT) kaas oo ku bixin doona adeeg gaadiid degdeg ah oo la isku halayn karo Como Avenue iyo Maryland Avenue. Basaska BRT iyo booteejooyinku waa kuwo raaxa leh oona sahlan in la isticmaalo.

Leenka H wuxuu mari doonaa Washington Avenue bartamaha magaalada Minneapolis. Waxay u adeegi doontaa Jaamacadda Minnesota Qaybta Galbeed iyo kambaasyada Qaybta Bari. Iyadoo la isticmaalayo Como Avenue, Leenka H wuxuu sii mari doonaa St. Paul. Waxay sii mari doontaa bariga waxayna u adeegi doontaa Maryland Avenue ka hor intaysan u leexan White Bear Avenue. Leenka H waxa laga filayaa inuu ku dhamaado Sun Ray Transit Center.

Maadaama qorshaynta Leenka H uu sii socdo, Metro Transit waxay tixgalin doontaa qorshayaasha inay ku bixiso adeeg maxali ah marinka.

Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo: metrotransit.org/h-line-project

***Ka eeg khariidad faahfaahsan barta metrotransit.org/h-line-project***

METRO H Line




### ***Jadwalka Mashruuca Hordhaca*** *(waa la bedeli karaa)*

- 2025-2026 — QORSHAYNTA
- 2026-2027 — NAQSHADA
- 2028-2029 — DHISMAHA


**CIDA LAGALA XIRIIRAYO MASHRUUCA:**
Alyssia Bell
HLine@metrotransit.org


Metro Transit

metrotransit.org/h-line-project


11-13-886300-25

# ***Bus rapid transit:*** *Gaadiid dhaqso badan, la isku halayn karo, oo raaxo badan*

Metro Transit waxa ay horumarinaysaa shabakada leenanka bus rapid transit (gaadiidka mashquulka badan ee baska) ee gobolka Twin Cities. Habkan wax ku oolka ah ee loo dedejiyo adeegga ayaa si weyn u wanaajinaya khibradda macmiilka waxayna caddaysay inay soo jiidato dad badan si ay si joogto ah u isticmaalaan gaadiidka.







## *Saldhigyada xaafadaha oo leh adeegyo*

Saldhigyada waxaa lagu qalabeeyay sifooyin loogu talagalay waayo-aragnimo badbaado iyo raaxo leh, oo la mid ah tareenka korontada ku shaqeeya.

- NexTrip, macluumaadka waqti saxda ah ee gaadiidka imaanaya iyo marka uu baxayo.
- Kulaylka la rabo, nalka amniga, iyo isgaarsiinta xaaladaha degdegga ah
- Goob kor u qaadan oo gaadiidka laga fuuli karo – ugu lugee baska adigoo wax jaraanjaro ah u fuulin
- Meelaha la saarto Baaskiilka iyo weelka qashinka

## *Joogsiyo xadidan, adeeg joogto ah*

BRT waxay shaqayn doontaa 10kii daqiiqoba mar inta badan maalinta iyada oo saldhigyo ku leh 1/3 ilaa 1/2 mayl kasta.

Sida qorshayntu u socoto leen kasta, Metro Transit waxay qiimeyn doontaa suuqa iyo baahida loo qabo adeegga baska deegaanka ee dheeraadka ah ee meelaha ku teedsan waddada.

## *Bixinta lacagta safarka kahor inta aan la gaarin joogsiyada degdega ah*

Si aad dhakhso ugu gasho albaabada oo dhan, basaska BRT ma qabaan sanduuqyada lacagta lagu rido. Macaamiishu waxay iibsan doonaan tigidh ama waxay ku dhufan doonaan Go-To Card ee laga helo saldhigga, sida tareenka korontada ku shaqeeya. Kormeerka safarka waxa qaadi doona Booliska Gaadiidka Metro iyo Wakiilada Barnaamijka Maalgelinta Badqabka Rakaabka (TRIP).

## *Kaabayaal cusub si loo kordhiyo xawaaraha*

Marka lagu daro saldhigyada la hagaajiyay iyo kala dheeraynta joogsiga ballaaran, Metro Transit iyo la-hawlgalayaasheeda ayaa sahaminaya fursadaha si ay xadadkan BRT uga dhigaan mid aad u dheereeya. Doorashooyinka waxaa ka mid ah:

- Mudnaanta ishaarada si aad u sii socoto; basaska waxay "weydiisan karaan" nalalka cagaaran ee hore ama fidsan ee isgoysyada qaarkood
- Jidadka baska-kaliya ee ku teedsan qaybo ka mid ah leenka si basaska looga ilaaliyo taraafikada

metrotransit.org/metro-network

METRO